

Saaxiibka/saaxiibadda iyo dadka qoys ka wada tirsan oo laga debcinayo xayiraadaha soo gelidda waddanka

Warsaxaafadeed | Taariikh: 02.09.2021

| Lr: 137 -2021

Laga bilaabo 12-ka Sebtember waxa saaxiibka/saaxiibadda iyo dadka qoyska ka tirsan ee ka imanaya waddamo ka baxsan Midowga Yurub/Aagga Dhaqaale loo oggolaanayaa in ay Norway soo galaan.

-Dad badan ayaa muddo dheer sugayey booqashada saaxiibka/saaxiibadda.

Xayiraadaha soo gelidda waddanku waa kuwo adag oo saamayn weyn ku yeelanaya nolosha dadka ay qabanayaan. Hadda waxa la gaadhay wakhtigii soo gelidda loo sahli lahaa saaxiibka/saaxiibadda, carruurta, waalidiinta iyo awooweyaasha iyo ayeeyooyinka. Mar haddii lagu dhaqmayo xeerarka adag ee jira ee ku saabsan tijaabo-qaadista iyo karantiilka, waxa hadda la samayn karaa debcin kale. Waxa shardi ah in lagu dhaqmo xeerarka caadiga ah ee ku saabsan tijaabo-qaadista iyo karantiilka. Taas darteed waxa dhici doona in qaybo ka mid ah dadkani ay hoteel karantiil joogaan maalmaha u horreeya, ayay tidhi Monica Mæland (H) oo ah wasiirka caddaaladda iyo heeganka.

Debcinnada la sameeyay waxa ay khuseeyaan dadka ka imanaya waddamo ka baxsan Midowga Yurub/Aagga Dhaqaale ee xidhiidh noocyadan soo socda ah la leh qof Norway deggan:

- Waalidiinta carruurtooda waaweyn iyo carruurta waaweyn waalidiintooda (hore ayaa loo hirgeliyay debcintii loo sameeyay carruurta da'yarta ah iyo awooweyaashooda iyo ayeeyoyaashooda)
- awoowe/ayeeyo iyo carruur awoowe/ayeeyo loo yahay
- Saaxiibka/saaxiibadda 18 sano ka weyn iyo carruurta da'yarta ah ee saaxiibka/saaxiibadda

Saaxiibbadu waa in ay codsi mariyaan nidaamka UDI ee codsiga booqashada saaxiibka/saaxiibadda (cinwaan: [Codsiga booqashada saaxiibbada - UDI](#)). Sida mararka kaleba, waa in qofku buuxiyo shuruudaha caadiga ah ee xeerka ajnebiga ee

ku saabsan xaqaa soo gelidda iyo joogista waddanka. Tusaale ahaan waa in ajnebiga fiisuhu waajib ku yahay ay marka hore fiise helaan intaanay halkaan imanin.